

Warbixinta Ammaanka Sanad-Badhka ee Soomaaliya

16ka Luulyo 2020

Nuxurka

Sanadka 2020 waxey ku bilaabatay iyadoo Al-Shabaab difaac la gelinayo balse weerarkeeda uu weli firfircoonyahay. Kooxda waxaa la soo derisay weeraro joogto ah oo ay Xulufadu ku qaadayeen goobaha baadiyaha ah oo ay ku xoogan tahay. Saddexdi bil ee sanadka ugu horreeyay, kooxdu waxey lumisay waddooyinki ugu muhiimsanaa oo ay caasimadda ku soo geli jirtay oo misna ku qaadi jirtay canshuuraha ay ka qaado caasimadda. In kastoo ay u suuragashay in ay sii waddo weeraradeeda dhanka magaaloyinka ah, waxey lumisay saddexdi bil ee u dambeeyay awooddeedi hore ee ku aadaneyd in ay fuliso weeraro ay la socdaan Gawaari Qarax laga soo buuxiyay (GQ). Intaasi waxaa dheer in ay u isticmaashay weerarada xaddidan ee GQ u suuragalay in ay ku weerarto xarumo militari ama ay isku daydo in ay ku disho madax iyada khatar ku ah. Tani waxey caddeeyneysaa in ay AS weli leedahay awood ay ku fuliso GQ balse ay la'dahay fursad iyo bartilmaameed ku habboon.


Bilowga

Hawlgalada Al-Shabab ee nuska koowaad ee sanadka 2020 waxey ku dhowyihiin weeraradeedii nuski koowaad ee sannadki 2019. Si kastaba ha ahaatee, saddexdi bil ee u dambeeyay waxey muujinaysaa in uu yaraaday xawaaraha weerarada AS. Tusaale ahaan, saddexdi bil ee u dambeysay (rubuci hore) falalka dilalka waxey ahaayeen 47 oo lamid ah inti dhacday rubuci kan ka horreeyay; hase ahaatee, sannadki 2019 dilalka waa ay kordhayeen saddex bil walba -- iyagoo ah 33 rubuci koowaad ee sanadka ayay noqdeen 39 rubuci labaad.

Sidoo kale, weerarada tooska ah ee militariga ee AS ku qaado xarumaha ay ku suganyihiin Xulafada waxay ahaayeen 46 rubucan, oo la mid ah kii rubucii la soodhaafay. Tani lafteedu

waxay tilmaan u tahay gaabinta xawaaraha weerarada AS, sababtoo ah waxay ku guuleysatay inay kordhiso weerarada ka dhanka ah xulafada rubucii labaad ee 2019 iyadoo gaarsiisay 51 halka ay ka aheyd 41 rubuci kaa ka horreeyay. Sidoo kale, waxaa jiray 41 weerar Aaalad Qarax ee Macmal ah (AQM) rubucii labaad ee 2020, halka ay weerarada AQM ay ahaayeen 37 rubuci koowaad ee sannadkan. In kastoo ay tani aad uga yar tahay weeraradi AQM ee ahaa 67 rubuci kan ku aadanaa ee sannadki hore, waa koror yar marki loo eego rubuci hore, innagoo ka fahmi karna in kooxda ay ula jeedo in ay sii waddo cadaadiiska loo adeegsado AQM.

Si kastaba ha noqotee, weerarada AQM ee sanadkan ayaa ah jajab ka mid ah wixii ay ahaayeen lixdii bilood ee ugu horreeyay sannadka 2019 markaasi oo ay 134 weerar ay dhaceen, halka 82 weerar ay dhaceen ilaa hadda sanadkan.




Jaantus 1 Weeraradii AS Rubucii Labaad 2020 iyo Rubucii Labaad ee 2019.

Incident	Apr-20	May-20	Jun-20	Apr-19	May-19	Jun-19
Assassination	12	18	17	4	26	9
Ambush	6	3	8	0	5	4
IED	7	13	21	17	26	24
Raid	16	14	16	7	24	20
Hand Grenade	6	3	5	2	11	11

SVBIED	2	2	0	1	0	0
VBIED	1	1	0	1	4	2
Person-Borne IED	0	0	2	0	0	0
Mortar Attack	1	9	12	0	1	0
Failed SVBIED	0	0	2	0	1	0

Jaantus 2 Weerarada oo faahfaahsan




Jaantus 1: Noocyada Weerar ee Bil Walba

Isbeddellada weerarada


AS waxay sii wadaysaa istiraatiijiyadeedii ay ku kordhineysay howlaheeda magaalooyinka si ay uga kabsato khasaaraha kaga imaanaya miyiga, iyo yareynta weerarada magaalooyinka goorta uu dareenka Xulafada ahi u weecdo magaalooyinka. Waxay kordhisaa oo ay yaraysaa heerka weeraradeeda bilo is dhaaf ah. Sida lagu arki karo weerarada kooxda 18kii bilood ee la soo dhaafay, sida lagu muujiyey Jaantus 4, weerarada AQM mararka qaarkood waa la yareeyaa ama kordhiyaa ilaa 50% bilba bishii ay ka dambeeyso.

Marki ay kooxdu kordhiso ololeheeda AQM iyo ololaha dilalka ee magaalooyinka, Xulafadu waxay ku jawaabaan in ay diiradda soo saaraan magaalooyinka, kooxduna waxay dib u yareeysaa weeraradeeda halkaas; ka dib, si ay haddane dib isugu muujiso waxay kordhisaa weerarada milateri ee tooska ah ee miyiga.

Howlgallada Iisbahaysiga ee meelaha miyiga ah waxay u muuqdaan inay saameynta ugu weyn ku leeyihiin weerarada GQ ee ka dhaca magaalooyinka, kuna khasbay AS inay u adeegsadaan si kooban sida bartilmaameedyada istiraatiijiyadeed ama taageeridda hawlgallada milatari. In kasta oo tan laga yaabo inay u muuqato inay nabadgelyada meelaha magaalooyinka ah ay xoogaa soo hagaageyso, hadana waxaad moodaa inaysan jirin wax fahan ah - iyo istiraatiijiyad aan lagula tacaali karin - istiraatiijiyadda AS ee kordhinta iyo yareynta howlaheeda magaalooyinka. Iyadoo aan la qaban ama aan la dilin tiro badan oo ka mid ah hawl-wadeenadeeda magaalooyinka, hoos u dhac kasta oo ku yimaada weerarada waxaa loo fahmayaa inay tahay istiraatiijiyad la-qabsi oo ula kac ah oo ay kooxda la timaaday. Intaa waxaa dheer, saamaynta COVID-19: lama inkiri karo yaraynta tirada bartilmaameedka AS; xafiisyo badan oo dowladda ah ayaa la xiray shaqaalahana waxaa lagu dhiirigeliyay inay ku shaqeeyaan guryahooda. Gaabinta guud ee hawlgalada AS waxaa laga arki karaa Weeraradeeda Ramadaanta, oo sida caadiga ah la arki jiray kor u kac weerarada kooxda sanad walba. Sida ka muuqata Jaantuska 7-aad iyo 8-aad, weerarada kooxda ee Ramadaanta hoos ayay u dhacday. Nooc walbo oo kamid ah weeraradooda waxay hoos u dhacday in kabadan kalabar Ramadaanka la soo dhaafay.



Jaantus 4 Isbeddellada Weerarada 18kii bilood ee la soo dhaafay




Jaantus 5 Weerarada lixda bil ee ugu horreyay, 2019 iyo 2020

Type of Attack	First Half 2019	First Half 2020
All Attacks	433	384
Assassinations	102	103
IED Attacks	134	82
AS Raids	130	131
S/VBIED	18	8

Mortar	10	36
Hand grenade	39	24

Jaantus 6 Weerarada lixda bil ee ugu horreyay, 2019 iyo 2020



Jaantus 7 Weerarada AS inta lagu gudajiray bisha Ramadaan


Incident	Ramadan 2020	Ramadan 2019
Assassinations	15	23
IED	10	22
AS Raids	23	32
S/VBIED	2	4
Handgrenade	5	12
Mortar	4	0

Jaantus 8 Weeraradii AS ee Ramadaan


Maalmaha Firfircoon

Waxaa jira qaab ay u weerarada u geystaan AS toddobaad kasta: waxay u egtahay inay si firfircoon u kordhiyaan weerarada dhammaadka usbuuca marka loo eego aagagga magaalooyinka. Meelaha baadiyaha ah waxay firfircoon tahay inta lagu jiro bartamaha usbuuca.


Sababta ayaa ah in ay jiraan bartilmaameedyo aad u yar inta lagu gudajiro dhammaadka usbuuca magaalooyinka, maaddaama bartilmaameedyada laga yaabo inay joogaan guryahooda ama ay beddelaan jadwalkooda. Dilalka qorsheysan ayaa ah kuwa ugu hooseeya inta lagu jiro dhammaadka usbuucyada uguna sarreeya Sabtida, maalinta koowaad ee usbuuca, iyadoo bartilmaameedyadu ay kusii jeedaan kana soo socdaan shaqada. Iyada oo isla sidatan ay tahay, weerarrada loo adeegsado AQM iyo kuwa loo adeegsado GQ waxay umuudnaan inay badan yihiin Jimcaha. Tani waxaa sabab u ah labo arrimood: tan koowaad waa in ay tahay markii kooxdu ay sida caadiga ah weerarto isu-imaatinnada ballaaran ee bartilmaameedyada ay ka leeyihiin magaalooyinka, tan labaadna waxay tahay in ay u adeegsato weerarada GQ iyo AQM si ay ugu xoojiso weerarradeeda meelaha fog-fog ee militariga.




Jaantus 9 Weerarada Maalin walba, Sanadka 2019 iyo 6da bilood ee ugu horreysa 2020




Jaantus 10 Dilalka Bastoolooyinka maalin kasta oo usbuuca ah



Sawirka 11 weerarada AQM ee dhaca maalin kasta oo usbuuca ah



Jaantus 12 Weerar toos ah oo militari oo ay qaaday AS




Jaantus 13 Weeraradii GQ maalintii

Diirada AS

Bartilmaameedka kooxda ayaa sii ahaanaya XDS iyo AMISOM. Muhiimadiisa labaad waa ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo shaqaalaha rayidka ah ee u shaqeeya DFS iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federeerka (DXF). Ahmiyaddeeda ugu weyn ee DXF ayaa ah Jubaland, halkaas oo ay ku kordhisay weeraradeeda, iyada oo isku dayeysa in ay ka faaiideysato xiriirka sii xumaanaya ee maamulkaas uu la leeyahay DFS iyo Itoobiya. AS waxay umuqataa inay ka faaiideysatay yareynta howlgalada Itoobiya ee taageeraya Jubaland si ay u xoojiso ciidamadeeda ku sugan gobolka isla markaana ay u kordhiso cadaadiska ay ku hayso ciidamada gobolkaas. Waxay kaloo sii waddaa beegsashada odayaasha diiday inay u hoggaansamaan amarkeeda ahaa in ay cafis dalbadaan.

Booliska iyo dadka shacabka ah waxaa lagu bartilmaamedsadaa dilal qorsheysan oo loo adeegsado bastoolado iyo AMQ oo lagu dhejiyo gaadiidkooda. Askarta XDS ee kelligood socda ayaa sidoo kale loo dilaa sidan, in kasta oo bartilmaameedyada ugu weyn ee ololahan ay u muuqdaan inay yihiin shaqaale rayid ah iyo saraakiil boolis ah.



Jaantus 14 Hay'adaha ay bartilmaameedsatay AS, bil walba

U Jawaabidda AS

Sida ka muuqata Jaantuska 15, weerarada inta badan lagu qaaday Shabaab waxaa ah ahaayeen weerarada cirka ee AFRICOM iyo weerarada gaarka ah ee Danab iyo Gorgor. In kasta oo ay ahayd hadafka labaad ee ugu badan oo ay bartilmaameedsadaan al-Shabab, AMISOM ayaanan qaadin weeraro ka dhan ah kooxda. Tani ayaa lamid ah xaaladdi rubuci hore ee sannadkan.




Jaantus 15 Weerarada Xulafada ee AS

Incident	APR	MAY	JUN
US Airstrikes	6	1	0
SNA Special Forces	0	3	4
SNA Regular Forces	1	3	3
FMS Forces	0	1	1
AMISOM	0	0	0

Figure 16 Breakdown of allied attacks on AS by month

Weerarada isbahaysiga ayaa sii wada saameynta ay ku leeyihiin hawlgallada miyiga ee AS 'iyo weerarada GQ ee lagu beegsado mgaalooyinka, kuwaas oo ka yimaada miyiga. Weeraradan ayaa

hoos u dhacay iyada oo ay kordheen weerarada xulafada ah. Si kastaba ha noqotee, weerarada magaalooyinka ee AS wax saameyn ah kuma lahan weerarada cirka iyo weerarada Howlgalka Gaarka ah; kooxda ayaa u yareynaysa weeraradeeda tixgalin ay siineeyso waaqica jira. Xaqiiqdii, weerarada magaalooyinka ee AS ayaa kordha goorta ay korodho hawlgallada miyiga ee ay dawladdu wado. Tani ayaa leh labo ujeedo: tan koowaad, iskuday ah sidii looga saari lahaa cadaadiska laga saarayo meelaha adag ee miyiga ah, iyo sidoo kale in ay ka faa'ideysto isbedelka xulafada ee diiradda lagu saarayo miyiga.



Jaantus 17 Saameynada Hawlaha Isbahaysiga ee Weerarada AS

Gunaanad

Rubucan waxaan aragnay hawgalada AS oo xawaare yareeynayo, in kastoo ay weli waddo dad laynta. Nasiib darrose, gaabiskan kumeelgaarka ah ma sii socon karo marki ay shaqaalaha dowladda ku soo noqdaan shaqooyinkooda, kadib marki uu dhammaado caabuqa sababay in qaar badan oo ka mid ah shaqaalaha dawladda ay ku shaqeeyaan guryahooda. Marki uu kordho dhaqdhaqaaqa dad u noqon kara hadafyo, kooxdu waxay heli kartaa fursad ay ku sii waddo ololaheeda dilalka ay ka fuliso magaalooyinka. Sida ku xusan warbixinteenaa tan ka horreysay, kooxdu waxay door bidaysaa adeegsiga isqarxinta iyadoo la adeegsanaayo jaakadaha qarxa, isla markaana yareyneyso weerarada GQ. Waxay sameysay hal weerar noocan oo kale ah rubucan. Khatarta ah in ay fuliso weeraro noocaas oo kale ah ayaa weli taagan.